

Sida waafaqsan Xeerka Horumarinta Waxbarashada Dadka Qaba Laxaad La'aanta (IDEIA), caruurta qabta laxaad la'aanta korriinka iyo garaadka waxay xaq ugu leeyihiin noocya badan oo adeegyo kala duwan ah dego dugsiyeedka min maalintay dhashaan ilaa da'da 21. Tallaabada ugu horraysa ee lagu heli karo adeegyadaas waa kobcinta qorshe.

Qorshayaasha Adeegyada Qoyska ee Qof-ahaaneed (IFSPs)

IFSP's waa qorshayaal adeeg oo loogu talagalay ilmaha yaryar. Xerka Federaalka wuxu farayaa inay IFSP's helaan carruurta min maalintay dhashaan ilaa saddex jirkooda, laakiin ay si dhaafin karaan muddadaas. Degmo dugsiyeedyada qaarkood, tusaale ahaan, IFSP waxa lagu dabiqi karaa ilaa ilmuhu galo dugsi xanaano. IEP wux u bilaabmaa markuu IFSP dhamaado, taas oo keenaysay isku-xidhnaan adeegga inta uu ilmuhu korayo. Muddada u dhaxaysa IFSP iyo IEP waxa qeexa ilmo kasta kooxdaasi si aanay u kala go'in adeegyadu.

IFSP's waxa loogu talagalay caruurta u baahan adeegyo dhexgalitaana sababtoo ah waxay qabaan daahitaan xagga korriinka, waxay laga helay xaalad jidheed ama maskaxeed oo laga yaabo inay keento daahitaan korriin ama halis u ah in ay qaadaan daahitaan korriin oo xooga haddii ay heli waayaan adeegyadaas dhexgelitaanka ee hore.

Tallaabada ugu horraysa ee waalidka ka shakiya in ilmahoodu buuxin waayo qodobadaas ha la xiriiro dugsigooda. Sida xeerka IDEIA, degmo dugsiyeedka ayaa ka mas'uula qabashada qiimayn haboon iyo bixinta adeegyada loo baahan yahay. Koox xirfadayahano ah iyo ilmaha waalidkiisa ayaa qeexi doona u-qalmanaanta adeegyada oo kobcin doona IFSP. Natijada ugu danbaysa waa qorshe isku-dhafan oo daboolaa dhammaan adeegyada ilmuhu u baahan yahay, oo ay ku jirto kuwa ay bixiyaan caafimaadka dadwenaha iyo wakaaladaha adeegyada bulshadu.

Kelmada "qoys" waa furaha IFSP waayo qorshuhu wuxu daboolaa baahiyaha qoyska ilamah oo dhan. Tusaale, waxa ku jir kara tababar waalidiinta ama dabiib xubnaha qoyska. Adeegyada hoos yimaad IFSP waxa lagu bixiyaa "jawi dabiiciya" – sida badan guriga.

Barbar dhig ahaan, IIEP waxay culayska saartaa keliya baahida waxbarashada ilmaha. Degmo dugsiyeedka ayaa ka mas'uula kobcinta iyo higelinta IEP jawi aan cididhi badan lahayn.

IFSP's iyo IEP's waxay wadaagaan tilmaamo qaarkood. Waalidiintu waa in la siiyo fursad ay si firfircoon ugaga qaybqaataan kobcinta labada qorsheba. Labada qorshe midna lama hirgelin karo iyada oo aan walidiinta fasax laga haysan (qorshayaasha hore waxay u baahan yihiin ogolaansho saxiixan). Labada nooc ee qorshe waa dib loo qoro sannad kasta, iyada oo mar walba dib loo eego.

Xeeka Federaalka wuxu bixiyaa rabitaannada IFSP and IEP ee kobcinta, laakiin gobolada iyo degmo dugsiyeedyada ayaa leh jajabnaan iyo sida loo tarjumayo ama loo fulinay qawaaniinta. Tas darted, waxa jira kala duwanaansho qorshayaashaas min gobol ilaa gobol iyo min degmo dugsiyeed ilaa degmo dugsiyeed.

Wixii macluamad dheeraada ama adeegyada u-doodidda, kala-xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.

Dhokomentigani ma aha talo sharciya, oo yaan sidaad loo qaadan. Taas darteed, macluumaaka halkan ku qorani ma beddeli karaan talo wax-ku-oola oo qareen. Xarunta Xeerka Laxaad La'aanta ee Minnesota waxa lagala xiriiri karaa (612) 334-5970.